Equal Access and Opportunities for Students and Educators

Equity & Civil Rights

PROMOTING EDUCATIONAL EXCELLENCE FOR ALL

Fahmitaanka sida cabashada takoorka sharci-darrada ah looga sameeyo degmadaada dugsi

Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (OSPI) ayaa ah hay'adda mas'uulka ka ah kormeerka waxbarashada dadweynaha K-12 ee ka jirta gobolka Washington. Gudaha OSPI, Xafiiska Sinnaanta iyo Xuquuqda Madaniga ah ayaa ka siisa caawimada degmooyinka dugsi, waalidiinta iyo ardayda arrimaha la xiriira shaciyada kala takoor-la'aanta gobolka iyo kuwa federaalka ah.

Maxay tahay "takooriddu?"

Takooriddu waa ula dhaqanka qof ama koox si cadaalad-darro ama sinnaan-la'aan ah maadaama ay ka tirsan yihiin koox la qeexay, loona yaqaan dabaqadda la dhowro.Takoorka (qoqobka) ayaa dhaca marka qofka si duwan loola dhaqamo, ama loo diido marinka loo maro barnaamijyada, adeegyada ama waxqabadyada iyada oo sababtuna tahay ka qayb ahaanta dabaqad la dhowro. Takoorka ayaa waliba dhici karta marka u dugsi ama degmo dugsi hoos uga dhacaan inay u waafajiyaan arday ama shaqaale naafanimadooda.

Dhabaatayanta (iyada sal ku leh dabaqad dhowran) iyo dhibaataynta u-tagga (galmada) ayaa noqon kara qaabab takoor markay abuurto jawi colaadeed.

Waa maxay Dabaqadda Dhowrani?

Dabaqadda dhowran ayaa ah koox ama dad wadaaga astaamo u dhexeeya oo lagaga dhowro takoorka iyo dhibaataynta sharciyada gobolka iyo federaalka ah. Dabaqadaha dhowran ee u qeexo Sharciga Gobolka Washington waxa ka mid ah:

- Lab/Dheddig
- Jinsiyad/Midab
- Caqiido/Diin
- Asal qowmiyadeed
- Naafanimo ama istcimaalka hagaha eyga tababbaran ama xaywaan adeeg
- Dookh Isku-tag, oo ka mid yihiin muujinta ama isku-aragga lab/dheddig
- Kuwa si sharaf lef looga sii daayay ciidamada ama heerka ciidamada

Maxaan sameeyaa haddii anigu aan aamminsanahay in ilmahayga la takoorayo?

Waa inaad ugu warbixisa welwelka aad ka qabto macallinka ilmahaaga ama maamulaha dugsi si deg-deg leh! Taas ayaa fursad u siineysa dugsigu inuu uga jawaabo xaaladda sida ugu dhakhsaha badan leh ee suurtagalka ah.

Haddii aadan la kulmi karin macallinka ama maamulaha dugsi, waxaad had iyo jeer la xiriiri kartaa xafiiska ugu weyn ee degmadaada dugsi. Degmo dugsi kasat ayaa leh qof ka mas'uul ah u jawaabka cabashoouinka ku saabsan takoorka.

Qofkan ayaa mararka qaarkood loo yaqaan Isku-duwaha Qodobka IX ama arrimaha la xiriiraha naafanimada, Iskuduwaha Qaybta 504.

Marka dhibaato lagu xallin kari waayo kulan, adigu waxaad xaq u leedahay inaad ku xereyso cabasho Degmada Dugsiga.

Waxa kale oo waliba xaq u leedahay inaad la xiriirto hay'adaha soo socda waqti kasta si aad u weydiisato baaritaan in laggu sameeo eedeynta takoorka:

Office for Civil Rights, U.S. Department of Education
(Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah, Waaxda Waxbarashada Mareykanka)
915 Second Avenue, Room 3310
Seattle, WA 98174-1099
(206) 607-1600 / TDD: (877) 521-2172
www2.ed.gov/about/offices/list/ocr

Washington State Human Rights Commission
(Guddiga Xuquuqda Dadka ee Gobolka Washington)
P.O. Box 42490
Olympia, WA 98504-2490
(360) 753-6770 / Toll Free: (800) 233-3247 / TTY: (800) 300-7525
www.hum.wa.gov

Maxaa dhacaya haddii aan dhibaatada kala xallin kari waayo dugsiga?

Haddii aadan ka xallin karin waxa welwelku kaahyo waxaad ku xereyn kartaa cabasho Degmada Dugsiga.

Qof kasta ayaa xereyn kara cabasho

Waxaad ku xereyn kartaa cabasho rasmi ah adiga oo u qora Kormeeraha Guud waraaq **sifeyneysa waxa dhacay iyo sbabta aad ugu maleyneyso inay tahay takoorid**. Waxa waxtar kuu leh haddii aad ku darto waxa aad rabto inay degmadu ku kacdo.

Maxay degmadu ku kici doontaa?

Shaqaalaha ay ugu talagashay degmadu inuu qabto cabashooyinka ayaa baari doona eedeyntaada oo siin doona Kormeeraha Guud warbixin qoran oo ku saabsan cabashada, iyo natiijooyinka laga helay baaritaanka. Adiga iyo degmada ayaa waliba laga yaabaa inaad wada xallisaan cabshada halkii baariitaanka laga samayn lahaa.

Muxuu Koormeeraha Guud ee degmadu samayn doonaa?

Koormeeraha Guud ayaa kuugu soo diri doona waraaq qoran gudahooda **30 maalmo taariikheed** oo diidi doona eedeyntaada ama kuu sifeyn doona ficillada macquulka ah ee ay qaadi doonto degmadu. Warqadda ayaa wadan doonta sida loogu xereeyo rafcaan Guddiga Dugsiga haddii aadan aqabalayn go'aanka Koormeeraha Guud. Tallaabooyin lagu saxayo arrinta waa inay dhacaan kama dambayn **30 maalmo taariikheed** markaad hesho waraaqda Koormeeraha Guud.

Maxaa dhacaya haddi aan aqbalayo go'aanka Kormeeraha Guud ama cidina iiga jawaabin waraaqdeyda?

Tallaabadaada xigta ayaa ah inaad rafcaan u qaadato Guddiga Dugsi.

Waa maxay rafcaanku?

Rafcaanku waa codsi in la beddelo go'aan rasmi ah.

Sideen ugu xereeyaa rafcaan Guddiga Dugsi?

Waxaad ku xereyn kartaa rafcaan adiga oo u qora waraaq Guddiga Dugsiga. Waraaqda waa inay ku jirto qaybta go'aanka qoran ee Kormeeraha Guud ee aad jeceshay inaa rafcaan ka qaadato iyo waxa aad jeceshahay inay degmadu sameyso.

Warqaddaada waa in lagu xereeyaa Xoghayaa Guddiga Dugsiga illaa markay tahay **maalinta taariikheed ee 10aad** kadib markaad hesho waraaqda jawaabta Kormeeraha Guud.

Muxuu Guddiga Dugsi samayn doonaa?

Guddiga Dugsi ayaa ballan u qaban dhageysi **maalinta taariikheed ee 20aad** kadib markay helaan waraaqda waraaqdaada rafcaan. Waxa kale oo waliba aad la qabsan kartaa doontaa taariikh ka duwan.

Maxaa dhicxi doona marka la joogo dhageysiga.

Waxaad sharraxi doonaa sababta aad u diiddan tahay go'aanka Kormeeraha Guud. Waxaad soo keenan kartaa markhaatiyo ama macluumaadka la xiriira rafcaankaaga. Guddiga ayaa kuu soo diri doona nuqul ah go'aankooda **kudaheed 10 maalmo** taariikheed kadib dhageysiga. Go'aanka ayaa wax ku jiri doona sida rafcaanka loogu qaato Xafiiska Koormeeraha Guud ee Tacliinta Dadweynaha haddii aad diiddan tahay.

Maxaa dhacaya haddii aan diiddanahay go'aanka Guddiga Dugsiga?

Waxaad rafcaan uga qaadan kartaa go'aanka Guddiga Dugsiga oo aad u qaadan kartaa Xafiiska Kormeeraha Guud ee Tacliinta Dadweynaha (OSPI).

Sideen anigu u xereeyaa rafcaan u qaadashada OSPI?

Waxaad xereyn kartaa rafcaan adiga oo u qora waraaq Xafiiska Koormeeraha Guud ee Tacliinta Dadweynaha. Waraaqda waa inay ku jirto qaybta go'aanka Guddiga Dugsiga ee aad jeceshay inaa rafcaan ka qaadato iyo waxa aad jeceshahay inay degmadu sameyso.

Waraaqdaada saxeexan waa inay heshaa OSPI **maalinta taariikheed ee 20aad** laga bilaabo marka la helo go'aanka guddiga dugsiga. Gacanta ayaa lgoo dhiibi karaa ama boostada ayaa loogu soo diri karaa cinwaankan:

OSPI
Administrative Resource Services
P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504-7200
Taleefanka (360) 725-6133

Maxay OSPI samayn doontaa?

OSPI ayaa ballan uga qaban doonta dhageysi Xaakin Maammul Sharci iyada oo maraysa Xafiiska Dhegeysiyada Maammuleed(OAH). Marka qaabsocodkan lagu gudajiro waxa lagu sii doonaa macluumaad ku saabsan dhageysiga.

Marka la joogi dhageysiga ayaad sharraxi doontaa waxa aad aadan ka aqabalayn go'aanka Guddiga Dugsiga. Waxaad soo keenan kartaa markhaatiyo ama macluumaadka la xiriira rafcaankaaga. Kadib dhageysiga, waxaad heli doontaa nuqul ah go'aanka garsooraha.

Equity and Civil Rights
Office of Superintendent of Public Instruction
P.O. Box 47200; Olympia, WA 98504-7200
(360) 725-6162 Fax: (360) 664-2967
TTY: (360) 664-3631
E-mail: equity@k12.wa.us
Abriil 20, 2011
SOMALI

Ka ogow wax dheerad ah halkan: www.k12.wa.us/

OSPI ayaa u siisa marin siman dhamaan barnaamijyada iyo adeegyada iyada oo aan ku saleysnayn dheddig/lab ahaan, sinji, caqiido, diin, midab, asal waddan, da'da, kuwa si sharaf leh looga sii daayay ciidamada ama heerka ciidamada, Dookh Isku-tag, oo ka mid yihiin muujinta ama isku-aragga lab/dheddig, jiritaan kasta oo naafanimo dareen dhimir ama jirka ah, ama isticmaalka hage ey tababbaran ama u adeegga xayawaanka ee qofka naafanim,ada qaba. Su'aalaha iyo cabashooyinka taakoorka la sheeganayo ayaa lagu hagaajin karaa the Equity and Civil Rights Director, (360) 725-6162 or P.O. Box 47200; Olympia, WA 98504.